Dr. Muxammad Humaam



# IS-DHEXGALKA AQOONTA

soo-koobe:
Sakariye Cabdallah Haaruun

**Dr. Maxammad Humaam**

# IS-DHEXGALKA AQOONTA IYO DHAMMAADKA TAKHASUSKA

**Soo-koobe:**

**Sakariye Cabdallah Haaruun**

# Tusmo


Qoraaga ........ 1
Sababta dhigane-han loo qoray: ........ 2
Qeexidda Dhigane-ha: ........ 2
Macnaha iyo Muunadda Is-dhexgalka aqoonta ........ 3
Qisadayda Dhiganehan ........ 4
Hordhac ........ 6
IS-DHEXGALKA AQOONTA MAADIGA ........ 9
Waydiinta Ogaalka guud ........ 10
Caqliga iyo Ogaalka guud ........ 10
Samaysankii Is-dhexgaleed ee Aqoonta aadanaha ........ 11
(Xilligii Mawsuuciyiinta) ........ 11
Tusaaleyaasha Mawsuuciyiinta ........ 12
Bilowgi kala go'a aqoonta ........ 13
Samaysankii Takhasusaadka ........ 14
Jabki iyo baabi'i Takhasuska ........ 16
Gaabiska Takhasuska ........ 17
Is-dhexgalka aqoontu waa soo-ifbax cimiyeed oo cusub ........ 19
Qaab-usocodka cilmi ee cusub ........ 19
Sababaha soo if-baxa mashruuca Is-dhexgalka aqoonta: ........ 22
JAADADKA IS-DHEXGALKA AQOONEED ........ 24
TUSAALEHA QAAB IS-DHEXGALKA FIILALKA AQOONEED: ........ 24
QAACIDO: ........ 26
CAQABADAHA IS-DHEXGALKA AQOONTA: ........ 26
MAXAA XAL AH ?!. ........ 28
IS-DHEXGALKA AQOONTA ISLAAMIGA AH ........ 31
IS-DHEXGALKA AQOONTA ISLAAMIGA AH: ........ 32
SIDA AY U ARKAAN FALAASIFADA IYO MANAADIQADU IS-DHEXGALKA AQOONTA ........ 33
SIDEE BAY MANDIQA U QAABISHAY AQOONTA ISLAAMIGA AH? ........ 33
CULUUMTA ISLAAMKA IYO MANDIQA –LOGIC-: ........ 35
XADKA IS-DHEXGAL EE MANDIQA IYO AQOONTA ISLAAMKA: ........ 36
IS-DHEXGALKA AQOONTA IYO USUULIYIINTA ........ 37
USUULKU WAA MANDIQA ISLAAMKA!: ........ 37

## Qoraaga

Dr. Muxammad Humaam, waxa uu leeyahay aqoon uu baaceedu dheeryahay, Sawraca iyo sumadda, ama farriinta dhigane-hiisuna isaga ayaa ay ka muuqataa.

1. Darajada sare ee PHD ayaa uu fiilka culuumta aadanaha ka diyaariyey Jaamacadda Maraakish, sanadku marki uu ahaa 2004 .
2. Ogolaansho sare ayaa lagu siiyey culuumta shareecada, sanadki 2001, Jaamicadda Maraakish.
3. Darajada saree e Master ayaa uu ka qaatay kulliyadda suugaanta ee Jaamicadda Maraakish, sanadki 1998.
4. Darajada 1aad ee Bachelor-ta ayaa uu ka qaatay Jaamacadda Ibnu Suhri, sanadki 1993.
5. Darajada saree ee Master ayaa uu ka diyaariyey Cilmiga maamulka, Jaamacadda Ibnu Suhri.
6. Hadda waxa uu bare ka yahay kulliyadaha Dhaqaaleha, Garsoorka, iyo Bani-aadantinimada, ee Jaamicadda Ibnu Suhri.

## Sababta dhigane-han loo qoray:

Dr. Muxammad waxa uu dhigane-han u qoray saddex sababood:

1- Mahruuca **Isdhexgalka Aqoonta**, oo aan helin Isku-day aqoomaysan oo xeel dheer.
2- Waxyaabaha keenaya In la isdhexgaliyo aqoonta oo ka maqan Cilmi-baadhisaha lagu sameeyo caalamka Islaamka.
3- Dhibka weyn ee ka dhasha kala-saarista aqoonta.

## Qeexidda Dhigane-ha:

Dhigane-hani waxa uu Ibo-fur u yahay:

1_ Aragtida ogaalka ee islaamiga ah.

2_ Waxa uu keenayaa caddaymo iyo xogo xeeldheer oo sugaya in Is-dhexgalka aqoontu uu ahaa Bud-dhigga Kacdoonadii aqooneed ee waaweynaa, kuwaas oo soo maray taariikhda aadanaha.

3_ In kacdoon kasta oo aqooneed, oo soo maray taariikhda, ay aqoonyahanka waday ahaayeen kuwo ku soo baxay oo ogaalkooda iyo aqoontooda uu qaabeeyey Mashruuca Is-dhexgalka aqoonta.

4_ Qoraagu dhiganihiisan inta lagu guda jiro ma diidayo takhasuska gaarka ah –in uu qofku fiil ka mid ah aqoonta ku takhasuso-, ee waa uu taageerayaa, waxa uu se diidayaa in uu takhasusku xadkiisa dhaafo, oo uu noqdo habkan uu maanta yahay. waxaana uu leeyahay: "haddii uu takhasusku dhaafo xadkiisa kaliya waxa uu noqonayaa laba shay:

1- Darajooyin maamul, in la dhaho hebal waxa uu sidaa Master|PHD, ee jagadaa ha qabto.

2- Caddaymo been-abuur ah, oo qofku waa mid aan lahayn aqoon sidaa u sii radan, oo dhaafsiisan fiilka uu ku takhasusay, iyo xitaa fiilka uu ku takhasusay masalooyinkiisa hoose.

5_ Waxa uu dhiganehani daboolka ka faydayaa dabeecadda Ogaalka Islaamiga ah, iyada oo loo sii marayo Is-dhexgalladi ka dhex dhacay aqoonta waxyiga iyo aqoonta bulshada, Aadanaha, iyo Falsafadda.

## Macnaha iyo Muunadda Is-dhexgalka aqoonta

Inta aynaan guda galin mucda dhiganeha waxa lagama-maarmaan ah in aynu ogaanno macnaha laga wado weedha Sumadda –ciwaanka- u ah dhiganehan, aadna ugu soo noqnoqaysa dhiganeha, ee ah **(Isdhex-galka aqoonta)?.**

Weedhan waxa loola jeedaa in qaabka ay maanta aqoontu u kala taallo ee ay u kala edagaysan tahay, laga badalo oo la isku dhafo. Tusaale: Jaamacadaha waxa lagu dhigtaa kulliyado kala duwan oo mid walba uu ardaygu ku qaato muddo dheer oo aan u dhigmin xogta kooban ee uu aqoonta ka helay, marka uu ka baxo kulliyadaana uu isu yaqaano –sida badan- qof aqoonti bartay oo aan wax kale u baahnayn. Markaa dhiganehani waxa uu keenayaa Mashruuc ah in aqoontan madaxa la isu galiyo, sidi ay isu raaci karaanna la isu raaciyo culuumta, oo uu ardaygu awood u yeesho isla muddadi uu hal kulliyad kaga bixi jiray in loogu dhigo aqoonti lagu dhigi jiray saddex kulliyadood oo kala gaddisan, sidaasna uu qofku kaligii u dhigmo saddex qof oo ka ku kala takhususay saddex fiil oo ka mid ah fiilalka aqoonta ama ka badanba.

## Qisadayda Dhiganehan

Sanadki 2020 ayaa aan xarunta cilmi-baadhista iyo waxabarshada ee **Namaa' ,** waxa aan iska diiwaangaliyey **Cilmu-nafsiga.** Ka dibna maamulka xarunta ayaa waxa ay dhaheen inta aan waxbarshada la idiin bilaabin waxa aad maraysaan Tijaabo la idinku kala saarayo, waxaana uu ardaygu kala doornayaa:

- In uu cilmi-baadhis sameeyo
- Iyo in uu dhigane akhriyo, ka dibna uu Imtixaan ku galo.

Anigu waxa aan ku jiray ardaydi dooratay in ay dhiganeha akhriyaan, Alle mahaddii dhiganihi nalagu yidhi akhriya waxa uu ahaa kan aynu soo koobayno ee **(Is-dhexgalka aqoonta iyo dhammaadka Takhasuska).** Waxa ay maamulka xaruntu noo sheegeen in aanaan ogolaansho u haysanin in aanu faafinno oo aanu cid kale la wadaagno dhiganehan, waxa markaa wax badan maskaxdayda ku soo noqnoqanayey Mashruucan badbaadiyeha ah, ee muhiimka u ah aadanaha maanta nool, si gaar ah dadka muslimiinta ah ee lanoo diiday in aanu u faafinno dhigane-haas dheemmanka ah iyo sida ay dadkayga soomaalida ahi si gaar ah ugu sii baahanyihiin.

Waa aan iska daayey, oo sidi ayaa aan u haystay dhiganahan, marki ay ka soo wareegtay laba sano ayaa aan mareegaha Enternatka ka baadhay; inlayn kan aan haysto ogolaansho uma haystee, wax aan baadho oo kolba Website been ii sheego oo inta ay magaca dhiganeha qoraan PDF raaciyaan, lingaxyo aan jirin oo ujeedkoodu yahay kaliya in aan iyaga dhex imaaddo oo aan ku habaabo waxyaabaha ay ku baahiyeen bartoodaba kama danbaysti Wabsite baan ka helay, kii oo la ogalaaday in la faafiyo. Marki baan farxad kala batay oo aan arkay in bulshadayda soomaalida ah uu guul mastaqbal u yahay, soo-koobitaankiisi ugu horreeyeyna waa adigan akhrisanaya Alle mahaddii, waxaana aan kaa codsanayaa: 1-In aad qayb laxaadle ka qaadato samatabixinta aqoonta bulshadeena

soomaalida ah, oo mashruuca uu dhiganehani ka hadlayo dhaqan galintiisa meel ku dhigo, jeer aad ka hirgalinaysid maalin un, ha dheeraato ama ha dhawaatee, intaa haddii aad samayso bulshadan waxa aad u gashay gobanimo iyo abaal aad iyo aad u weyn.

2_ In aad buug yarahan faafintiisa iyo in uu bulshada gaadho oo ay baraarugaan aad qayb laxaad leh ka noqoto.

## Hordhac

Qoraagu hordhaca dhiganehan waxa uu ku sheegay laba qodab oo kala ah:

- In Is-dhexgalka aqoontu uu yahay sida biyaha badda ee dhanaan iyo biyaha macaan oo kale, oo gogga la isu galiyey; sababtuna waxa ay tahay luqadda – Eray-xibinta - iyo dhaqanka fiil-aqooneed kasta gaarka u ah in uu ku adkaanayo in fiil aqooneed kale lagu dhex daro, fardaaminta iyo xalka murugtanina uu yahay in la fududeeyo Eray-bixinaha aqoonta; si ay u fududaato in fiil-aqooneed kale loogu dhex daro oo darso.
- Sababta uu qoraagu u qoray dhiganahan.

Waxa uu sheegay in uu qoraagu dhiganehan u qoray laba sababood, kuwaas oo midna ay sabab cilmiya tahay, midna sabab fikriya ay tahay, waxaana ay kala yihiin:

**1_ Sababta cilmiga ah:** Qoraagu waxa uu dhiganehan ka hor qoray cimi-baadhis ku saabsanayd aqoonyahanki muslimka ahaa ee Abu Xayaan At-Tawxiidi. Inti uu cimi-baadhista waday waxa uu arkay in uu aqoonyahankani ahaa mid caalim aan lagaga daba dhufan ku ahaa: afka carabiga, logic-ga, falsafadda, aqoonta anshaxa, cilmiga bulshada, cilmiga la dhaho cilmul-kalaamka, tarjumaadda, iwm. Arrintanina waxa ay sabab u noqotay samaynta baadhitaanno ku saabsan boqollaal ka mid ah aqoonyahanki muslimka ahaa ee ay aqoontu isku midka u ahayd.

Intaa ka dib waxa uu qoraagu is waydiiyey saddex waydiimood o kala ah:

1- Sidee ayaa ay aqoontu isu dhex gashaa?.
2- Waa maxay teedka iyo xadka uu leeyahay Is-dhexgalkaasi?.
3- Suuregal ma tahay xiligan in laga sheekeeyo baraarug aqoonaysan oo ku saabsan Arrintan?.

2_ **Sababta fikriga ah**: Qoraagu waxa uu si shakhsi ah u jeclaystay in uu cilmi-baadhaha xilligan nool ee waxa uu bartay ee halka fiil-aqooneed ama labada ah wax ku baadhaya, cidhiidhiga baadhitaan iyo aqooneedna dareemaya in la diraaseeyo habki iyo hannaanki uu kaga bixi lahaa dhibkaas, oo uu u gaadhi lahaa heer ay aqoontu isugu mid u noqoto, xogta uu baadhayana uu uga daba gali kari lahaa fiil kasta oo ay xidhiidh la yeelato.

# QAYBTA 1AAD

# IS-DHEXGALKA AQOONTA MAADIGA

# Waydiinta Ogaalka guud

## Caqliga iyo Ogaalka guud

Waxa aad u fara batay dadaallada lagu bixinayo diraasaynta Caqliga iyo waxyaabaha ku duugan, waxaana jira dad badan oo aaminsan haddii uu qofku dhaqankiisa iyo xadaaraddiisa ka maqanyahay Caqligu aanay ahayn xadaarad iyo dhaqan dhammaystiran, ee ay yihiin kuwo kala dhiman. Markaas in la darso xubin-nimada Caqliga aadanaha waxa ay noqotay dadaallada aqooneed ee ugu waaweyn, iyo furaha dhabta ah ee loo maro fahamka xaqiiqada aadanaha.

Hase' ahaatee in la diraaseeyo qaab-dhismeeka Caqliga iyo shaqooyinkiisu waxa ay keensanaysaa in la isla kaashado filial aqooneed iyo takhasusyo kala duwan, sida: Cellbiology, Developmental biology, Genetics, Biochemistry, Biophysics, Pharmacology, Electronics, Information Technology, Biomedical Engineering, Mathematics, Statistics, Psychology, Linguistics. Haddii in la darso Caqliga oo kali ah uu u baahday waxan oo Takhasus ah, wixi kale ee ka sii weyna maxaa aad u malaynaysaa?.

Haddii aad is dhahdo qoraagu Caqliga waa uu buunbuuninayaana waxa aad ku degtaa oo aad markhaati uga dhigataa ahmiyadda uu Caqligu leeyahay sida uu Quraanka kariimka ahi ugu soo celceliyey intaas oo Aayadood, oo dhammaan Caqliga ka hadlaya, iyada oo ay midba dacal ka istaagayso.

## Samaysankii Is-dhexgaleed ee Aqoonta aadanaha

### (Xilligii Mawsuuciyiinta) [1]

Waagii hore aqoontu waxa ay ahayd mid isdhex gashan, oo la isku dhex dhigto, marka laga yimaaddo xilliyada qaar taariikhda soo maray oo aqoonta la kala qaad-qaaday, taasna ay keenaysay arrimo fikriya, iyo kuwo bulsho.

Waxaana uu qoraagu sheegay in mar kasta oo dhaqaalaha dadku fiicnaado ay firfircoonaanayeen dhaqdhaqaaqyada fikradeed ee umaddaasi. Marka aad se eegto taariikhda waxa aad arkaysaa in qof ama qaran barwaaqo ku nooli aanu badnayn fakarka iyo hal-abuurku, ee uu ku badnaa kuwa danyarta ah, ama ugu yaraan aan maal-qabeenno ahayn; sababtuna waxa weeye in uu qofku marka uu xaalad aan la mahadin ku noolyahay doondoono oo ka fakaro sidi uu xaaladdan uga bixi lahaa, haddii’ se uu badhaadhe iyo barwaaqo ku noolyahay maxaa ka maqan ee uu raadin?!, markaa arrintaasi waxa ay u baahantahay baadhitaan gaar ah, iyo in qoraaga lala eego.

Is-dhexgalka aqoontu waxa uu giriigga ka firfircoonaaday inti u dhaxaysay Qarnigi 2aad_5aad, muslimiintana inti u dhaxaysay Qarnigii 10aad-14aad, halka ay Is-dhexgalka aqoontu reer yurub gabigoodaba ka dhex firfircoonaatay Qarnigii 15aad, halkaas waxa aad ka arkaysaa in muslimiintu ay reer yurub Mashruuca Isdhexgalka aqoonta kaga horreeyeen 5 qarni oo dhan!.

([1]) Qoraagu erayga (Mawsuuciyiin) waxa uu ka wadaa Aqoonyahankii ay aqoontu isugu midka u ahayd, ee mid kastaaba gaarkiisa u yaqaannay Fiilal aqooneed oo fara badan, aqoonta mid iyaga ka mid ahi uu yaqaanayna ay u dhigmaysay takhasusyada 6 qof oo kala duwan ay  barteen xilligeenan hadda.

## Tusaaleyaasha Mawsuuciyiinta

Qoraagu wuxu sheegay in aqoonyahanka hal-abuurka ah loo qaybiyo saddex qaybood:

**Hoggaamiye:** waa Aqoonyahanka takhasuska ballaadhiya, aragti yar oo ka mid ah fiil aqooneed ka sii dhaliya oo dhanbala aragtiyo iyo qaybo cusub oo aan hore loo haynin.

**Rabbaani:** waa Aqoonyahanka dhidibada u taaga ee sii adkeeya qay-qaybinti uu sameeye kii isaga ka horreeyey ee Hoggaamiyuhu, caddaymo badan oo dheeraad ahna u keena Aragtiyahaa.

**Isku-badale:** waa Aqoonyahanka ay isugu midka u yihiin fiilalka aqoonta oo dhani, mid walbana Mutakhasis ku ah, jaadkan danbena waxa ay reer yurub ka soo dhex baxeen waa' dhawayd, sida : **Leonardo**: waxa uu ahaa mid ku fiican sawir gacmeedka, Qoraa, Engeneer, Cosmologest, faylasoof ah. **Immanuel Kant:** marka uu jaamacadaha lecture-rada ka jeedinayo waxa uu dhigi jiray cilmiyada: Mathematics, Anthropology, Geography, Logic, Pedagogy, Philosophy. **Dr. Gustave Le Bon,** iyo **Ernsnt Mach.**

Qoraagu waxa uu sheegay taariikhda marka la eego in Aqoonyahankii ku fiicnaa Mashruuca Is-dhexgalka aqoonta, ee fiilal fara badan oo aqoon ah yaqaannay ay ahaayeen kuwo ku dhex dayacan dadkooda, oo marka ay dhintaan un lagu baraarugo oo loo baroorto, Halkaas waxa aad si toos ah uga arkaysaa innagu haddaynu nahay dad soomaali ah in aynaan gaar ku ahayn dayacidda dadka haldoorka ah, ee uu yahay dhib la inala qabay tan iyo waa' hore.

## Bilowgi kala go’a aqoonta

Kala go’a aqoontu waxa uu bilaabmay marka reer galbeedka laga hadlayo qarnigii 19aad. Waxaana jira sababo keenay kala go’aas, kuwaas oo kala ahaa:

1_ Dabeeca ogaalka iyo aqoonta laftirkeeda, oo markasta oo muddo la joogaba aqoontu waa ay sii ballaadhataa, cilmiguna isaga ayaa isqay-qaybiya oo iskala gura, sida uu qabo **Jacques Lacan.**

2_ Maqnaanshaha Manhaj ka dhaxeeya aqoonta, fiilalkeeda kala duwan.

3_ Jaamacadaha iyo xarumaha cilmi-baadhis, oo qayb yar oo fiil aqooneed ka mid ah ka dhigaya fiil gaarkiisa u taagan.

4_ Is-haysadyada iyo loollanka u dhaxeeya dawladaha; oo fiilka aqooneed ee maraykanka ka ah (Siyaasadda), yurub waa qayb ka mid ah cilmiga bulshada, ama cilmiga garsoorka. Sidoo kale cilmiga marka jarmalka la joogo loo yaqaan **Anthrapology**, maraykanka waxa looga yaqaanaa **Physical Anthrapology.**

## Samaysankii Takhasusaadka

Waxa jira qodobbo saddex ah, oo uu qoraagu ku tilmaamay in ay ka qayb-qaadanayaan samaysanka Takhasusaadka, waxaana ay kala yihiin:

**1_ Qayb-qaybinta aqoonta,** oo ah in aqoon guud laga dhex saarayo qaybo ka mid ah, ka dibna lagu magacaabayo oo laga dhigayo cilmiyo gaar ah, tus: cilmiga **Falsafadda,** waxa laga soocay oo laga hoos saaray cilmiga:

1. Xisaabta
2. Logic-ga
3. Cilmu-nafsiga.

**Cilmu-nafsiga** laftiisa ayaa haddana la sii kala saaray, markaasaa waxa laga dhanbalay qayb gaar ah oo loo bixiyey **Psycoimmunology** oo ah qaybta lagu diraaseeyo ilmaha yar iyo sidi looga ilaalin lahaa dhacdhaca nolosha, ha ahaato mid dhanka dariska kaga yimaadda, amaba ha ahaato mid dhanka goobta waxbarasho ee uu jooga ka yimiye.

**2_ Sare-u-kaca aqooneed ee cusub**, kaas oo ka jawaabaya waxa uu caalamka aynu maanta joognaa la noolyahay ee horu-mar iyo isbeddel ah.

**3_Mutakhasiska,** qofka hal fiil oo aqooneed ku takhasusay ayaa isna qayb weyn ka ah samaysanka Takhasusaadka iyo fiilalka aqooneed ee kala baahay; sababtuna waxa weeye haddii uu dhawr fiil oo kala duwan ku xeeldhaaraan lahaa ardayda iyo goobta waxbarasho ama cilmi-baadhis ee uu joogo ayaa uu tusaale nool u noqon lahaa, oo waxa dhici lahaa laba qodab:

1- In maamulka Jaamacadaha iyo kan wasaaradaha waxbarashaba ay ka wada fadhiistaan sidi aqoontan la isugu celin lahaa, oo wixi fiilalka aqooneed israaci karaya la isu raacin lahaa, iyaga oo kala tashanaya dadka ku takhasusay fiilal

dhawr ah, iyo kuwa bartay manhajka iyo qaabka loo dejiyo ama wax looga bedalo.

2- Haddii ay taasi dhici waydo, ardyada ayaa waxa ay ku dayan lahaayeen aqoonyahankoodan aqoonta badan yaqaanna, oo waxa ay samayn lahaayeen dhawr kulliyadood oo kala duwan ayaa ay isku wadi lahaayeen, mid marka ay dhammeeyaanna hore ayaa ay ka bilaabi lahaayeen kulliyad kale.

Faylasoofki Spain u dhashay ee la dhihi jiray **Jose ayaa** dadka mutakhasisiinta ah ee maanta nool waxa uu ku magacaabay ( Badawda cusub)!; waayo ma awoodi karo in uu sameeyo baadhitaan ka baxsan waxa yar ee uu ku takhasusay, marka ay sidaas tahay miyaanay ahayn in uu hilmaamay ujeedki guud ee aqoonta oo ahaa ogaalka iyo garashada guud ee ku saabsan wax kasta oo ay suure tahay in uu ka war keeno cilmiga aadanuhu?. Mar haddii wax allaale iyo waxa aad u baahantahay aanad baadhan karayn, kaliya fiilkaaga yar mooyee, maxaa ay waxa aad baray aqoon ka tahay?!.

Qoraagu mutakhasisika maanta nool waxa uu ku masalay beeroole soo dhex galay beertiisi, oo la dhacay hal geed oo yari sida uu ab-qaalmo, ee uu u baxo, oo hilmaamay dhammaan dhirti kale ee ay beertiisu ka koobnayd, cidda ka masuulka ahna ay isaga ahayd.

## Jabki iyo baabi' i Takhasuska

Sida asalka ah ee lagama maarmaanka ahi waxa weeye in aanay aqoontu kala maarmin, oo ay is dhex gasho, suurta gal ma aha markaa in ay horumarto aragti tusaale ahaan ku saabsan dhulka, iyada oo ka duulayso fiilal aqooneed oo kala tag-tagsan, qoraagu marki uu arrintan tilmaamayey waxa uu soo qaatay tusaale haddi kaligii la fahmo ay ka dhigantahay in buuga oo dhan la fahmay. Tusaalehaasi waxa weeye fulkaane ayaa meel ka qarxay, cilmiga diraasaynaya fulkaanahaas iyo sababihi keenay, iyo waxa uu dhib gaystay waxa weeye cilmiga loo yaqaano **Volcanology,** oo ah cilmiga diraaseeya fulkaanayaasha iyo qaraxooda. Dhinac kale waxa fulkaanahaas qarxay ka diraasaynaya cilmiga loo yaqaano **Climatology**, oo ah cilmiga isku hawla ee darsa cimilada, iyo wixi ku saabsan; oo cilmigani waxa uu fulkaanahan qarxay ka darsayaa dhinaca ah sida uu u saameeyey hawada. Dhinac saddexaad waxa isna imanaya cilmiga loo yaqaanno **Geology**, oo ah cilmiga diraaseeya dhulka iyo macdanta kala duwan ee ku duugan; fulkaanahan qarxay sida uu u darsanayaana waxa weeye in uu baadho macdanta dhulka ku duugan iyo sida ay fulkaanayaashu uga qaayb-qaataan in ay macdantaasi meel kale u guurto, maadaama uu fulkaanaha qarxay kala firdhiyey.

Halkaas maadama oo ay hal dhacdo oo dhacday wada diraaseeyeen saddex cilmi oo gaar u kala taagan, waxa kaaga soo baxay sida aanay suuregalka u ahayn aqoontan in la kala saaro, oo imika tusaale ahaan saddexdan cilmi ee **Volcanology, Climatology, Geology,** maadaama waxa ka dhaxeeya uu yahay dhulka iyo cimilada diraasayntooda, waxa aynu odhan karnaa **Universeology**[2] ama **Eartheology**[3]?!. Saddexda cilmina waxa laga dhigayaa saddex cutub oo cilmigaas

[2] - **Cilmiga kawnka,** waa magac aynu innagu samaynay, oo aynu isugu gaynay saddex fiil-aqooneed oo waxa ka dhaxeeya uu ahaa diraasaynta waxa kawnka dhex yaalla, macdan, cimilo iyo wixi la mid ah.

[3] - **Cilmiga dhulka,** isaguna waa magac aynu saddexdi cilmi ee aynu soo sheegnay isugu gaynnay.

aynu u bixiyey **Cilmiga kawnka** ama **Cilmiga dhulka** ka mid ah. Sidaas ayaa Isdhexgalka aqoontu uu ku noqday waddada kaliya ee la isugu soo celin karo qaybihi aqoonta ee la kala guray.

## Gaabiska Takhasuska

Kacdoonnadi aqooneed ee soo maray taariikhda aadanaha, sida kacdoonki Gaaliilyo waxa ay dhammaantood ahaayeen midho uu dhalay Is-dhexgalka aqoontu, taasina waxa ay si toos ah oo aanu shaki yari ku jirin u caddaynaysaa in aqoonyahanka Takhasuska ee hal fiil iyo laba nafta dul dhigtay, wax dhaafsiisanna aan aqooni in aanay awood u lahayn kacdoon aqooneed haba yaraadee.

**Shirkii 1998!**

Tirsigu marki uu ahaa sannadii 1998, ayaa ay reer galbeed tashadeen, waxa ay ku shireen magaalada Baariis. Shirkoodu waxa uu daarranaa in aqoontu qaabkan ay hadda tahay aanay innagu anfacaynin –haddaynu reer galbeed nahay-, ee aynu lix iyo labo isugu celinno, innaga oo u marayna midaynta saddex qodab:

1- **Eray bixinta**; waayo Eray bixintu waa waddada 1aad ee laga gali karo in laba aqoonood iyo wax ka badan la mideeyo, waanad xasuusataan in uu qoraagu horraanti iyo hordhici dhiganahan ku tilmaamay in eray-bixintu ay tahay caqabad cilmi kasta hor taagan.

**2- Manhajka:** oo ah meelaha ugu muhiimsan ee Is-dhexgalka aqoontu ay ka helayso awood dhammaystiran. Haddii manhajku ahaan lahaa mid tixgaliyey oo dhaqan galiyey Isdhexgalka aqoonta, arday kasta waxa uu ku khasbanaan lahaa in uu aqoonta wada maro, isaga oo aan talo laga waydiinayn.

3- **Agabka:** aqoon kasta waxa loo adeegsadaa agab gaar ah, oo fiilkaas aqooneed loo adeegsado, haddii’ se la mideeyo aqoonta dabcan waxa

iyaguna midaysmaya agabki loo adeegsanayey waxaas oo aqoon ah oo la isugu keenay.

## Is-dhexgalka aqoontu waa soo-ifbax cimiyeed oo cusub

### Qaab-usocodka cilmi ee cusub

Aqoonta reer galbeedku waa ay horumartay, markaasay diidday in diinta iyo dhaqankuba ay saameeyaan aqoonta, aqoonti reer galbeedka markaa waxa diinba u noqotay diin la’ aanta. Aqoontan diin la’ aanta ahi markaa waxa ay soo saartay qof waxa hareerihiisa ku nool, dad iyo duunyaba ku eegaya il maaddi ah; sida in ay alaabta la gato oo kale yihiin waxa adduunka saaran oo dhan, intaa ka dib waxa dhacay in uu qofki ay soo saartay aqoonta reer galbeedka ah ee diinta lagala dagaallamay noqday mid ka fog oo ka dheer dabeeci iyo qaabki ay aadanuhu ahaayeen, waxaana sidaa ku magacaabay faylasoofki reer galbeedka ahaa ee **Friedrich Nietzsche**, sidoo kale faylasuufka **Edgar Morin** ayaa waxa uu ku tilmaamayaa reer galbeedka bartay aqoonta diinta iyo dhaqanka lagala dagaallamay laba tilmaamood oo kala ah:

A. **Nooci iyo jaadki aadame ee la la’ aa**: Waxa uu ka wadaa Nooca aadame ee maqan, mar haddii qofki Alle ugu talo galay ee u abuuray in uu yahay sayyidka noolaha, ay reer galbeedku kala dagaallameen diinti hagaysay ee hoggaaminaysay, tusaysaysana in uu yahay masuulka uunka miyaanu markaa qof maqan ahayn?!.

B. **Meeraha habawsan**: waxa uu ka wadaa mar haddii Allihi abuurtay ee jidka u jeexay, ay iyagu reer galbeedku ka duween jidkaas, meeshi uu ku baran lahaa jidkaa oo ahayd aqoontana ay noqotay meesha ugu badan ee ay diintu ka fogtay, in uu noqonayo markaa mid lumay oo leexday, sidoo kalena ifka ku habawsan. Aqoonti reer galbeed ee diinta lagala dagaallamay waxa ay noqotay mid indha la’ , oo qofki bartayna uu qarqoomay, meel alle iyo meel uu u socdana aan garanayn. Waxa ay noqotay aqoon aan u dammaanad qaadi karin qofki bartay in uu ku noolaado nabadgalyo, deganaan, iyo raaxo;

waayo sidee baa uu nabadgalyo ugu noolaadaa iyada oo dadka ifka kula nool ee bartay aqoonta isba uu bartay –aqoonta reer galbeed- ay dhigayso in aad wixi dantaada ah qabsato inta aad ifka kor saaran tahay, haddii ay dantaadu gasho in aad kurka ka jarto oo aad layso boqollaal qof aad dilayso, ma qof qofkaasi ifka kula noolyahaybaa nabad ku ladaya?!.

Halkaas ayaa waxa imanaya farqiga u dhaxeeya aqoonta reer galbeed iyo aqoonta Islaamka, oo aqoonta Islaamka lama kala saaro aqoonta iyo diinta, haddii aad kala saartana markaas ayaa habawgu kuu bilaabmayaa. Marka aynu eegno aayaddi ugu horreeyey ee soo degta quraanka waxa ay isku xidhaysay akhriska iyo ilaahay; sababtuna waxa weeye waxa ay lahayd aayaddaasi akhri, ogow, baadh, hase ahaatee ogaalkaagu waa in uu Alle ku garansiiyaa. Halkaas markaa waxa aad ka arkaysaa sida uu islaamku aqoonta ugu xidhay diinta iyo rumaynta Alle.

Aqoonta islaamku waxa ay soo saartay qof ifka inta uu joogo Alle garanaya, isaga iyo aadameha kula noolba dantooda iyo sidi ay adduunkan ugu noolaan lahaayeen ciso iyo sharaf garanaya, aqoonteedi leh, hal-abuurkeedi leh, oo hilawgi iyo u-hagarbixi aadanahana ay diintiisu farayso, halka ay aqoonta reer galbeedku soo saartay qof **Mulxid (Alle-kood)** ah, oo leh “ ma jiro Alle noolaha uumay, ee waa ay iska yimaaddeen oo dabeecadda ayaa abuurtay”, waxa kale oo ay aqoonta reer galbeed ee diinta iyo dhaqanka laga fogeeyey soo saartay **Calmaani** leh “ Ifka waxa i hagaya, iina sheegaya oo ii sharraxaya cid kasta oo aan xidhiidh la yeelanayo, iyo wax kasta oo aan u baahanahay waa ogaalka aadanaha, ilaahay waa uu i abuuray, waanan caabudayaa, cibaadada iyo arrimaha Allena waxa ay ku joogaan albaabka guriga, ama masjidka. diintu waxba kama sheegi karto siyaasadda aadanaha, waxba kama sheegi karto arrimaha dhaqaale ee ifka, waxba kama odhan karto aadanaha iyo sida aan ula

dhaqmayo, waxba kama sheegi karto diintu nolosha si guud!. Si kale marka loo dhaho Calmaanigu waxa uu leeyahay "Diintu waxba kama garanayso, oo waxba kalama socoto arrimahayga, jaadki ay doonaan ha ahaadaane, aniga ayaa se garanaya, oo aqoonta diinta iyo anshaxa lagala dagaallamay ayaa i baraysa" !.

Qofki ay aqoonta reer galbeed soo saaray waxa uu noqday mid aan fakarayn, sida uu leeyahay faylasoofki Jarmaniga ahaa ee **Martin Heidegger**, sidaas ayaa uu faylasoofki **Friedrich Nietzsche** xadaaradda reer galbeedka ku tuhmay in ay tahay mid aan fakarayn, iskaddaa in ay fakartee waxa uu ku sheegay **Friedrich** in ay tahay mid ka baqaysa in ay fakarto; sababta oo ah haddii la fakaro waxa kala daadanaya xadhko indho-iska-rid la isugu xidh-xidhay.

Si looga gudbo xaalladan aan la mahadin ee ay gaadhay aqoonta reer galbeed, ayaa waxa bilaabmay dhaqdhaqaaq cusub oo shaki galin iyo iswaydiin ka keenay qaab-dhismeedka ogaal ee reer galbeedka, iyo sida aanay aqoontaasi ugu dammaanad qaadi karin qofka mustaqbalkiisa, nabad galyadiisa iyo noloshiisaba. dhaqdhaqaaqan aqoonyahanki reer galbeed ee hor kacayey waxa ay dhaheen "aqoontu sidan diinti iyo dhaqanki laga siibay innaguma anfacayso, aadamaha ifka innagula noolna kuma anfacayso ee aynu dib ugu noqonno, diinta iyo dhaqanka aynu ka dhigno kuwa saamayn ku leh aqoonta" . Aragtidani waxa ay la la bilaabantay fiisigisyanki waddanka Jarmalka u dhashay ee **Heisenberg,** marki ay taariikhadu ahayd 1925, waxa ay horumartay argtidaasi iyada oo soo maraysa fiisigisyahanki **Wolfgand Pauli,** fiisigisyanki **Erwin Schrodinger,** fiisigisyahanki weynaa ee **Albert Einstein.** Aragtidan reer galbeed ee reer galbeedka kula doodaysa aqoonta, dhaqanka, iyo diinta yaynaan kala saarin, waxa ay sal dhigatay saddexda nin e kala ah:

1. **Feyerabend**
2. **Tom**
3. **David Joseph Bohm.**

Fikraddani may ahayn mid gaar ku ah reer galeedka, ee aqoonyahan muslim ah, iyo xarumo cilmi-baadhiseed oo dalalka islaamka laga leeyahay ayaa kala qaybqaatay; maadaama ay aragtidani tahay mid wax badan ka badali doonta hab-araggi nololeed ee reer galbeedka; sababta oo ah marka la dhaho diinta iyo dhaqanku waxa lagama maarmaan ah in aanay noqon kuwo lagala dagaallamo aqoonta, waxa daboolku ka qaadmayaa iska-sheegato fara badan, iyo mala-awaal aan tiro lahayn oo aadanaha lagu sababayey.

## Sababaha soo if-baxa mashruuca Is-dhexgalka aqoonta:

Sababaha keenaya mashruucan uu qoraagu buugan u qoray ee ah (Is-dhexgalka aqoonta), waxa uu qoraagu ku sheegay in ay yihiin saddex sababood oo kala ah:

**1_ Doonis aadame:** oo qof kasta waxa uu jecelyahay in uu wax walba wax un ka ogaado, haba yaraado haddii uu doonee, taasina waxaa ay ku suurta galaysaa iyada oo Takhasuska meesha laga saaro, aqoontana la is dhexgaliyo.

**2_ Midaynta aqoonta**: waa baaq lagu baaqayo in aqoontan kala tagtay la isu soo dabbaalo, oo la mideeyo; maadaama hal ujeeddo ay aqoonta iyo ogaalku u socdaan, halkaas ujeeddo oo ah Qiritaanka xaqiiqooyinka waaweyn ee ifka ka jira.

**3_ Aqoonta reer galbeed, iyo sida ay diinta uga ilaaliyeen,** mashruucan (Is-dhexgalka aqoontu), waxa uu xoogaystay dabayaaqadii qarnigi 20aad; si uu u fardaamiyo dhibaato kasta oo u cagajuglaynaysa mustaqbalka aadanaha, sida:

1. Dagaallada.

2. Gaajada.
3. Waxa ay reer galbeedku ula baxeen **(Human Over Population),** oo ah in dad goob dhuleed degan iyo waxa ay haystaan ee wax-soo-saar ahi kala badanyihiin, oo ay dadku ka badanyihiin wax-soo-saarka. **Human Over Population-**ka ayaa waxa loo qaybiyaa laba qaybood, oo kala ah:

**1_ in ifka waxa yaalla ee quud ah iyo aadanaha ku nool ay kala yaryihiin**, oo quudku yaryahay, taasina waa gef diiniya; oo alle dad aanu quudkooda haynin muu abuureen, quraanka kariimka ahna waxa uu ku sheegay in uu isagu yahay kan quudinaya oo arsaaqaya dhamman aadanaha.

**2- in meel yar oo gaar ah**, sida magaalada Madiina Al-munawara, la isugu keeno aadanaha ifka ku nool, oo la dhaho khayraadkeeda ha quutaan, oo ha ku noolaadaan, taas caqliga ayaa diidaya in ay wax soconaya tahay. Dhibaatooyinkaas waaweyn Takhasusku uma awood laha uu ku fardaamiyo, dantu waxa ay noqotay markaa in aqoonta badhtanka la isu dhigo.

## JAADADKA IS-DHEXGALKA AQOONEED

Qoraagu waxa uu is-dhexgalka aqooneed iyo noocyadiisa u qaybiyey saddex jaad oo kala ah:

1. **Is-dhexgalka eray-bixineed:** oo ah in fiil kasta oo aqooneed eray-bixintiisa la fududeeyo; si ay suuragal u noqoto in fiil aqooneed oo kale lagu daro.
2. **Is-dhexgalka manhaj:** oo ah in manhajka waxbarasho uu noqdo mid ay aqoontu isku jirto, oo aanay kala jirin, mar kaas ayaana uu ardaygu noqonayaa mid ku khasban in uu aqoonta wada barto.
3. **Is-dhexgalka aragtiyaha:** oo ah in wixi aragtiyaha is leh meel la isugu geeyo.

### TUSAALEHA QAAB IS-DHEXGALKA FIILALKA AQOONEED:

Qoraagu waxa uu halkan ku taxay qaabka ay isu dhexgalayaan fiilalka aqooneed, waxaana ay isu raac-raacayaan, oo loo wada darsayaa qaabkan:

1_ Cilmiga bulshada, Taariikhda, Siyaasadda.

2_ Cilmiga Geography-ga, cilmiga Architectural Engineering-ka.

3_ Cilmiga Anthropogy-ga, cilmiga Anthology-ga, cilmiga Archaeology-ga, cilmiga garsoorka, cilmiga Geology-ga, cilmiga Engineering-ka, Cilmiga Falsafadda.

4_ Cilmiga Dhaqaaleha, cilmiga Taariikhda, cilmiga Siyaasadda, cilmiga Maamulka, Cilmu-nafsiga.

### Fiiro gaar ah:

1_ Magaca loo bixinayo qayb kasta oo is raacsan waa wax aan sidaa ugu sii baahnayn in la isugu dhibo, oo tusaale ahaan qaybta 3aad waxa loo bixin karaa **Fiilka garsoorka**; maadaama uu garsoorku yahay qayb ka mid ah raacaa. Magac kale oo laga fakaray, aynu soo wada dhex galayaan qaybtii la is raaciyeyna waa loo

bixin karaa, muhimaddu waa in qaababkaa la isu raaciyo dhigashada iyo diraasaynta fiilalka aqooneed, oo sidaas inta la isu hoos geeyo ay yaraato muddadi, qofkuna xog badan ku helo, halki ay afar ama shan jeer ku soo laabmi lahayd muddadu haddii fiil kastaba loo darso sida uu maanta yahay, ee ah in qayb yar oo kastaaba ay tahay kulliyad ardayga ka qaadanaysa 4-7 sano!.

2_ Waxa aad ka dheehanaysaa qay-qaybinta iyo qaab-israacinta in ay jiraan cilmiyo soo galaya dhawr meelood, sida: Siyaasadda oo ku jirto dhawr qaybood; taasi waa arrin caadi ah, oo hal cilmi ayaa waxa uu xidhiidh la yeelanayaa cilmiyo kale oo fara badan, markaa waa in cilmiyadaa loo geeyo oo meel lagula darso.

## QAACIDO:

(Mar kasta oo ay badato is-dhexgalka takhasusaadku, waa mar kasta oo ogaalka iyo aqoonta qofku ay badato). Tus: gabadh baa waxa ay isku baratay Cilmiga Anthropology-ga, cilmiga Xadiiska, cilmiga Archaeology-ga, cilmiga garsoorka, cilmiga Geology-ga, cilmiga Engineering-ka, Cilmiga Falsafadda, halka ay jiraan lix qof, oo lixdan fiil mid kastaaba mid dhigtay, markaa gabadhaasi waxa ay u dhigantaa lixdaa qof ee kale oo la isku daray.

## CAQABADAHA IS-DHEXGALKA AQOONTA:

Qoraagu waxa uu sheegay in ay jiraan laba caqabadood oo hor taagan mashruucan weyn ee Is-dhexgalka aqoonta, waxaa ay yihiin:

1. **Hadalka aadanaha:** oo uu ka wado eray-bixinta ay aqoon kastaa leedahay, oo sidi uu hore u soo tilmaamay qoraagu ah caqabad u baahan in dadaal badan lagu bixiyo furfuridda iyo fududaynteeda; si ay u hirgasho in aqoonta la is dhex galiyo.
2. **Nidaamka maamul ee Jaamacadaha:** oo waxa uu nidaamka maamul ee jaamacaduhu caqabad u noqonayaa iyagi ayaa gacanta ku haya kulliyadihi ay ardaydu baranayeen, iyo qaabkoodi, iyaga Ayaan leh go’aanka is hoys-gaynta ama kala gaynta fiilalka aqooneed.

Shaki kuma jiro in Is-dhexgalka aqoontu ay lagama maarmaan u tahay aadanaha si guud, si gaar ahna kuwa manta nool, waliba dadkeenna soomaalida ah ee la daalaa dhacaya duruufta maamul iyo ta’ bulsheedba, shaki kuma jiro in Is-dhexgalka aqoontu uu si’ weyn wax uga tarayo fardaaminta mashaakisha haysta dadkeena, haddana cidda go’aanka kama danbaysta ah u leh in ay aqoonta is dhexgaliyaan waa:

1) Maamulka wasaaradda waxbarashada iyo guddoonta sare ee tacliinta.
2) Maamulka jaamacadaha iyo xarumaha cilmi-baadhista.

Mashruucani –Is-dhexgalka aqoonta- waa kacdoon u baahan in baraarugiisa iyo wacyigalintiisa la yeesho, waxaana uu u baahanyahay in maskax, maal, iyo muruqba loo huro. Cidda uu mashruucani sida weyn u taabanayaa waxa weeye:

1. **Nidaamka jaamacadaha**, sidi aynu hore u soo sheegnay.
2. **Bareyaasha –macallimiinta**-; sababta oo ah haddii uu macallinku ku hubaysanyahay mashruucan oo uu ardaygu arko in uu macallinkiisu ka dhisanyahay fiilal aqooneed oo fara badan, ama baraarugga iyo u oolaynta mashruucan uu leeyahay, waxa shaki la' aan ah in uu ardayguna ku daba faylayo macacallinkiisa, uuna u dhaqdhaqaaqayo sida uu falawgiisa u qaban lahaa oo uu u heli lahaa mashruucan iyo hirgalintiisa, hadii ay awooddu gaadhsiin waydo dhaqangalintiisana waxa aanu ardaygu ka gaabiyeen wacyigalinta uu bulshada la wadaagayo mashruucan iyo macnaha weyn eek u duugan.
3. **Mutakhasiska:** ku wadhwadhay[4] hal fiil, oo waxa laga dhaadhicinyaa in uu xilligiisa ku koobay wax yar oo uu muddo yar ku heli lahaa, iyo in uu awood weyn waliba u leeyahay helidda xogaha ugu muhiimsan ee ay ku taaganyihiin guud ahaan fiilka aqooneed ee ugu muhiimsan ogaalka iyo aqoonta.

[4]- ku xeel dheeraaday.

## MAXAA XAL AH ?!.

Soomaalida ayaa waxa ay ku maahmaahdaa **(Waayeel hadal waa loo saraa, ee looma saafo)**, oo ay ka wadaan mar haddii aanu qofku ahayn qof yar oo aan la qabsan murtida iyo macnaheeda, hadalka iyo meesha uu isugu biyo dhacayo, ee uu yahay qof weyn, ma jirto wax baahi ah oo loo qabo in carrabka lagu ballaadhiyo oo la caddeeyo waxa loo jeedo, ee waa loo kor xaadiyaa, markaas ayaa uu fahmaa. Waxa aan ka wadaa qoraagu meel dhiganihiisa ka mid ah oo uu ku taxay waxa uu barnaamijkani u baahanyahay ma jirto, marka laga yimaaddo in uu sheegay maamulka jaamacadaha iyo mutakhasisiinta. Iyada oo ay sidaasi jirto haddana marka aynu eegno bulshadeena soomaalida ah oo dabcan ka duruuf duwan bulshooyin badan oo ifkan innagula nool; si aynu u hirgalinno mashruucan weyn ee Is-dhexgalka aqoonta, oo aynu ugu badbaadinno dadkeena, waxa aynu u baahannahay waxyaabahan soo socda:

1_ Dad ku takhasusay fiilal aqoneed oo badan.

2_ Si' gaar ah waxa aynu u baahannahay dad ku takhasusay cilmiyada kala ah:

- ✓ Cilmiga **Manaahijta**, sida loo dejiyo iyo sida mid degsan wax looga badallo.
- ✓ Cilmiga **luuqadaha** (Afafka).
- ✓ Cilmiga **Maamulka.**
- ✓ Cilmiga **Siyaasadda.**

3_ Waxa aynu sidoo kale u baahannay Siyaasiyiin xilka inoo qabta, kuwaas oo matala bulshadan soomaalida ah baahiyahooda, oo hadda waxa aynu dhiganahan ku tilmaamaynaa maadaama uu ahaa Is-dhexgalka aqoonta, waxa ay awood u yeelanayaan in ay badalaan manhajka waddanka , ayna ku weynyihiin **damiirka** iyo **diintu.**

4_ Hogaamiyayaal jaamacadeed, oo fahamsan mashruucan; si ay innoogu fududaato in aynu soo saarno arday ama qof ku hubaysan aqoon tayeysan oo isku dhafan.

5_ Dad uu damiirkoodu noolyahay, dhammaan qaybahaa afarta ah, ee aynnu kor ku soo xusnay waxba tarimaayaan haddii aanay lahayn damiir iyo damqasho ku aaddan bulshadoodan soomaalida ah, ee aan waxa loo dayn, ee la bililiqaystay wax kasta oo qiimo u samaynayey, ilaa haddana ku wada furdurirdda iyo fadqalaynta, waxa ku socda dadaallo lagu rabo in lagu ragaadiyo diintooda, dhaqankooda, dhaqaalahooda, caafimaadkooda, wax-soo-saarkooda, hal-abuurkooda, macdantooda iwm.

Bulshada soomaalidu markaa uma baahna qof xil sare haya oo kaliya, ee waxa ay u baahantahay qof damiir danqanaya leh, damiirkaas ha la tago markaa meel allaale iyo meeshi uu tagi karo oo ka mid ah xilalka bulshada loogu adeego.

# QAYBTA 2AAD

# IS-DHEXGALKA AQOONTA ISLAAMIGA AH

## IS-DHEXGALKA AQOONTA ISLAAMIGA AH:

Aqoonta islaamiga ahi iyada ayaa tusaale nool u ahayd Is-dhexgalka aqoonta, marki ay aqoonti iskaamiga ahayd soo dhex gashay aqoon kale oo aan islaami ahaynna waxa aqoonyahanki muslimka ahaa ka dhex dhashay dood adag. Waxaana bilaabmay iswaydiinno aqooneed, iswaydiinnadaas oo ku kala abtirsanaya:

- ✓ Taariikhda ay culuumta kala duwan leedahay.
- ✓ Cilmiga Manhajyada.
- ✓ Falsafadda cilmiga.

Waxaana uu qoraagu ku koobsaday aragtiyahaa in uu ka soo qaato laba kooxood oo kala ah:

- ✓ Usuuliyiinta[5] iyo Fuqahada.[6]
- ✓ Falaasifada iyo manaadiqada[7].

---

[5]- Waa aqoonyahanka muslimka ah, ee ku dhex-dhunbaday fiilka aqooneed ee islaamiga ah, ee loo yaqaanno (Usuulka).

[6]- Waa aqoonyahanka muslimka ah, ee ku dhex-dhunbaday fiilka aqooneed ee islaamiga ah, ee loo yaqaanno (Fiqiga).

[7]- waa dadka aadka u bartay cilmiga (**logic-ga)**

## SIDA AY U ARKAAN FALAASIFADA IYO MANAADIQADU IS-DHEXGALKA AQOONTA

Ilaa waagi **Arasdo** mandiqu (logic) marka la darsayo waxa uu ahaa mid aan ka fogayn falsafadda, waxaaba jiray qaar yidhi mandiqu waa qayb ka mid ah falsafadda.

### SIDEE BAY MANDIQA U QAABISHAY AQOONTA ISLAAMIGA AH?

Dhaxalka giriigga in la soo tarjumo, oo aqoonta islaamka iyo afka carabiga ah lagu daraa waxa ay faaftay xilligi dawladdi islaamiga ahayd ee Cabbaasiyiinta; sababtuna waxa ay ahayd waagi hore in wax la tarjumaa waxa ay ahayd shaqo shakhsiyeed, hase ahaatee dawladda cabbaasiyiintu waxa ay ka dhigtay shaqo dad u gaar ah loo sameeyey, dadkaas ayaa waxa ay noqdeen dhaqdhaqaaqi sababta u ahaa in xadaaradda iyo dhaqanka giriigga iyo ka islaamiga ah ay isu gudbaan. Intaa ka dib falsafaddi giriigga oo wadata aqoon kale oo ay ka mid yihiin: mandiga (logic), xisaabta, cilmiga dabeecadda ayaa gaadhay carabta.

Ruuxdi iyo dabeeci giriigu iyada oo sii maraysa falsafadda ayaa ay ku faaftay oo maashaysay adduunka, meelaahaas ay ku faaftayna waxa ka mid ahaa caalamka islaamka.

Falsafddaas giriiggu waxyaabihi ay aaminsanayd aaminsantahayna waxa ka mid ah:

1. Sanam-caabudka aan xadka lahayn ee sii daysan.
2. In maadada iyo walax kasta oo ifka saaran ay waligeed jirtay, xilli ay bilaabantay iyo cid bilawdayna aanay jirin.
3. In aanu ilaah jirin.
4. In aanay jirin wax aragti ah oo laga haysto abuurka.

Halkaas ayaa waxa ku kala duwanaaday is-dhexgalka manhajki aqooneed ee yaallay caalamki islaamka, iyo manhajkan aqooneed ee giriigga, ee aan ilaahba aaminsanayn, cilmiga loo yaqaanno **(Cilmul-kalaamka)**[8] ayaa ahaa meeshi ugu badnayd ee dhaxalka giriiggu uu kala xidhiidhay aqoonta islaamka. Muxammad al-qasaali ayaa waxa uu sheegay in mar kasta oo ay badato dabagalka iyo ku mashquulidda uu qofku ku mashquulayo cilmul-kalaamka, ay yaraato diintiisu, mar kasta oo uu diintiisa ku mashquulana uu yaraado aaminaadda uu u hayo cilmul-kalaamka.

Caalimki la odhan jiray Ibnu Khalduun ayaa waxa uu hor kacayaa aqoonyahanka muslimka ah ee diiddan ee naqdiya falsafadda, halka uu Ibnu Rushdi hor kacayo kuwa taageersan, midkastaana kamuu nabad galin naqdin iyo ka taba-tag. Halkaas aya waxa dhidibadu u aasmeen kacdoon la dhaho **(Naqdiyayaasha falsafadda giriigga**), kacdoonkaasi falsafadda giriigga kumay naqdinayn:

1. Aqoonyari ama fahan xumo ku sugan muslimiintan naqdinaya.
2. Kala-duwaansho ku aaddan dhanka waddada lagu helo aqoonta iyo ogaalka.
3. Ad-adayg mad-habeed, ee waxa ay u naqdiyayeen waxa uu ahaa in ay kala duwanyihiin meesha ay labada manhaj ka kala dhinbiil qaataan, oo falsafadda giriiggu waxa ay ka dhinbiil qaadataa qiyaas-qaadashada[9], halka manhajka islaamiga ahi uu ka dhinbiil qaato tajribada iyo dabagalka shayga, ilaa laga gun gaadhayo xaqiiqadiisa dhabta ah ee biyo kama dhibcaanka ah.

[8]- waa cilmi ku dhisan dad hadalkood maankooda ku sugaya diimaha, oo ka tagay kitaabka Alle iyo sunnada rasuulka (NNKH), culimada muslimiintuna waa ay ka digeen cilmigan.
[9]- in si' wax loo xukumo ama wax looga dhaho looga qiyaasqaadanayo shay kale, oo hadday doonaan aanay isku duruufba noqonayn.

Falsafadii giriiggu waxa ay soo gashay oo ay isku dayday in ay saamayso oo ay lug ku yeelato aqoonta islaamka, waxa’ se la dagaallamay aqoonyahanka muslimka ah ee loo yaqaanno (Usuuliyiinta), iyo sidoo kale (Fuqahada), oo uu horkacayo Al-Qasaali, isaga oo haddana ka mid ahaa aqoonyahnki iyo culimadi Is-dhexgalka aqoonta.

## CULUUMTA ISLAAMKA IYO MANDIQA –LOGIC-:

Isla bilawgi uu Mandiqu soo galay aqoonta islaamka, waxa ku kala aragti duwanaaday aqoonyahanka muslimka ah, oo isku qabtay xaqiiqada mandiqa, iyo xidhiidhka uu la leeyahay Falsafadda?, ma qayb ka mid ahbaa, mise horu-dhac baabu u yahay.

**Arasdo** waxa uu aaminsanaa in aanu Mandiqu haba yaraatee ka mid ahayn Falsafadda, halka ay aqoonyahan badan oo muslim ahi aaminsanaayeen in uu ka mid yahay Falsafadda. Hase ahaatee Aragtida ku dhex faaftay muslimiinta ayaa ahayd in aanu Mandiqu ahayn qayb ka mid ah Falsafadda, sidoo kalena aanu ahayn aqoon gaar u taagan, ee uu yahay agab fikir gaar ah leeyahay. Aragtidani waxa ay caalamka islaamka ku faaftay iyada oo ay haddana jiraan aqoonyahan iyo mufakiriin ka naqdiyey oo si weyn uga soo horjeestay Mandiqa.

## XADKA IS-DHEXGAL EE MANDIQA IYO AQOONTA ISLAAMKA:

Aqoonyahanka iyo culimada muslimiintu waxa ay aad uga hor tageen oo ay dadaal ba' an ku bixiyeen in aanay Falsafadda iyo Manadiqa –Logic- giriigga ahi soo dhexgalin saamaynna ku yeelan aqoonta islaamiga ah; sababtuna waxa ay ahayd kala duwanaanshaha weyn ee u dhaxeeya dhaxalka giriigga iyo ka islaamka, oo falsafadda iyo Mandiqa giriiggu waxa ay ku dhisnaayeen caqiidadi khaldanayd ee **Arasdo**, halka ay aqoonta islaamiga ahi kaga dhisan tahay caqiiqdada kalinimada ilaahay.

## IS-DHEXGALKA AQOONTA IYO USUULIYIINTA

### USUULKU WAA MANDIQA ISLAAMKA!:

Cilmiga usuulka loo yaqaanno waxa uu matalayaa mandiqa culuumta islaamiga ah, waana halka ugu sarraysa ee uu gaadhay caqliga muslimka ah.

**Cilmiga Usuulka:** waa cilmi halbeeg ah, kaas oo koobsanaya baadhitaanka axkaamta sharciga ah, daliillada guud, dariiqa lagu gaadho daliilka, iyo is-waafajintooda. Waxa uu sheegay aqoonyahanka muslimka ahaa ee Ibnu Khalduun in uu qofkii ugu horreeyey ee cilmigan wax ka qoray ahaa Caalimki weynaa ee Imaamu Shaafici. Cilmigan Usuulku waxa uu qofka fiqiga yaqaanna u yahay sida uu Mandiqu qofka Falsafadda yaqaanna ugu yahay furiheeda, iyo fudaydiyaheeda.

Cilmigan Usuulku waxa uu xidhiidh adag la leeyahay dhammaan fiilalka kale ee aqoonta shareecada, sida xadiiska, fiqiga; sababtaas aawadeed ayaa uu aqoonyahanki muslimka ahaa ee la odhan jiray Abu Xayaan Al-Andalusi u yidhi "qofka doonaya in uu aqoonta shareecada xaqeeda siiyo oo looga danbeeyo, waxa khasab ku ah in uu sugo oo uu ku xeel dheeraado cilmiga Usuulka" . Cilmigan Usuulka iyadoo loo dejiyey axkaamta shareecada, haddana waxa uu awood u leeyahay in uu ka jibbo keeno waxna ku kordhiyo, oo loo adeegsado culuum kale, sida Taariikhda, culuumta aadanaha, sidaas ayaa uu Usuulku culuumta shareecada ku hore marinayaa, oo uu ugu noqonayaa in ay tahay culuum caalami ah, taas oo saamayn iyo bud-dhig weynba u ah culuum badan oo ka mid ah culuumta aadanaha.

Dhammaad.